

# Leenka cusub ee METRO G

Gaadiidka dheereeya ayaa dhawaan ka shaqa bilaabi doona wadooyinka Rice Street iyo Robert Street

Leenka METRO G waa leen Bus Rapid Transit (BRT) kaas oo ku bixin doona adeeg gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo Rice Street iyo Robert Street. Basaska BRT iyo booteejoojinku waa kuwo raaxa leh oona sahan in la isticmaalo. Leenka METRO G wuxuu dhex mari doonaa Market Place Drive iyo Little Canada Road ee ku taala Little Canada; Rice Street ee ku taala Little Canada, Maplewood, Roseville, iyo St. Paul; Cesar Chavez Street iyo State Street ee ku taaka St. Paul; Robert Street ee ku taala St. Paul iyo West St. Paul, iyo Mendota Road ee ku yaala West St. Paul iyo Inver Grove Heights.

Metro Transit waxay qorsheynaysaa inay furi doonta leenka G laba qaybood si ay si fiican ula shaqeyso dhismaha wadada la qorsheeyay.

Wajiga 1aad, oo imaanaya 2027 waxa ku jiri, doona qaybta waqooyi ee Leenka G ee ka imanaya Little Canada Transit Station tagayana Robert & Kellogg oona ku yaala badhtamaha magaalada St. Paul.

Wajiga 2aad, oo imaanaya 2028 waxa ku jiri, doona qaybta koonfureed ee Leenka G oona ka imanaya Robert & Fillmore ilaa Xarunta Dakota County Northern Service Center.


## Naqshadaynta Hordhaca ah ee Boosteejada Leenka G

Metro Transit waxay raadinaysaa ra'yi-celintaada ku aadan naqshadaha hordhaca ah ee boosteejada Leenkaa G.

Ka fiiri qorshayaasha faallana ka bixi hadda barta [metrotransit.org/g-line-project](http://metrotransit.org/g-line-project) ama iimayl ugu dir ciwaanka [GLine@metrotransit.org](mailto:GLine@metrotransit.org).



Iskaan mari si aad u booqato websaydka mashruuca, fiiri khariidadda isdhixgal, kana dhiibo war-celin.



## Jadwalka Mashruuca Hordhaca (waa la beddeli karaa)

• 2022-2024

QORSHAYNTA

• 2024-2025

INJINEERNIMO

• 2026-2028

DHISMO

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:

Nasser Mussa

[GLine@metrotransit.org](mailto:GLine@metrotransit.org)

612-618-0277

# **Bus Rapid Transit (Nidaam Gaadiid Bas oo Mashquul badan): Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan**

Metro Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibradda macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka



## **Boosteejooyinka xaafadaha oo leh adeegyo**

Boosteejooyinka waxaa lagu qalabeeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip, macluumaadka waqtii saxda ah ee gaadiidka imaanaya iyo marka uu baxayo
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdeega ah
- Goob kor u qaadan oo gaadiidka laga fuuli karo – ugu lugee baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Meelaha la saarto Baaskiilka iyo weelka qashinka

## **Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah**

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshaha leenka kasta u sii socdo, Metro Transit waxay qiimayn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeega baska deegaanka oo lagu soo kordhiyo wadada.

## **Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdega ah**

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiisha ayaa iibsan doona tigidh ama waxay ku taaban doonaan Go-To Card mashiinta taala boosteejada, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona wakiilada TRIP.

## **Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha**

Marka lagu daro saldhigyaada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeyaa. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socdo; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaa liyaa taraafikada